ILA QOSOL



Sheekooyin Xiiso leh oo lagu Madodaalaysto

Ibrahim Rashid Hassan

ILA QOSOL

SHEEKOOYIN XIISO LEH OO LAGU MADODAALEYSTO

W.Q: IBRAHIM RASHID HASSAN

Ibrahimhassan896@gmail.com

©Daabacadii (1Caad)

2016

1.

1. SHEEKO QATAR AH

Sheeko qatar ah
Hada ka hor nin hurda la'aan dhibtay, kadib waxoo aaday naag dadka maskaxda daweeso, waxoona ku dhahay " habeenkii ma seexan karo waxaan marwalbo ku soo boodaa in sariirta hoostiisa la igu jiro, kolkaan soo kacana oo aan fiiriyo cidi kuma jirto"
naagtii waxay ku dhahday "waxaad ubaahantahay in lagu daweeyo waxaad timaadaa isbuucii labo jeer, marwalbana 100$ soo qaado"

Xarfaankii bil markoo imaaday bishii labaad wuuba imaan waayay, hase ahaatee asigoo wadada socdo ayaa waxaa aragatay naagtii oo ku dhahday "war haye waaba imaan wayday oo maxaa kugu dhacay"?

xarfaankii waxoo dhaahy "Nin Farsamo yaqaanka gacanta ah aan arintii usheegay, misana waxoo igu dhahay sariirta laftigeeda lugaha ka jar, waana ka jaray lacag yarna wuu igu sameeyay kkkkkkkkkkk

# # #

2. MR. HINTISHOOW

Waqti hore ayaa Madaxweeynihii Soomaaliya waxa uu booqday shiinaha kolkaa ayuu waxa uu la kulmay madaxwaynaha shiinaha oo wiil u dhashay.markaas ayaa layidhi MR. madaxwayne waa inaad u magac bixisaa wiilka madax waynaha u dhashay Maxaweeynihii Soomaaliay talo ayaa ku cadaatay isagoo yaaban oo wax uu sameeyo garan la' ayuu hindhisay HITISHOOOW!!!!!!HITISHOOW markaasaa ayaa lawada sacbiyay oo la yir magac fiican ayaad u bixisay wiilkan HITISHOOW waa magac qurux badan! sidaa ayaa wilkaasi loogu bixiyey Mr.HITISHOOW.

# # #

1.

3. SHEEKADII DAANYEERKA

Ninbaa waxuu tagay carwada markaaso waxuu arkay inti xeywaan aheed meesha joogeen ayago qoslahayaan ilaa hal dameer moyee, ninkii maalinta ku xigtay maalintaas ayuu carwadii tagay waxu u arkay dameerki qoslahaya marka waxuu weydiyey ninka carwada leh sidee ku dhacday dameerka maanta kaligiis ayuu qoslahayaa shalayna wuu aamusnaa markaa ninkiis baa waxuu yiri shalay ayaa daanyeerka sheeko qosol ah sheegey maanta ayuu fahmay dameerka).

# # #

4. NINKII JIIFAN WAAYAY

Habeen baa nin jiifay sariirtiisa, markii la gaaray saqdi dhexe ayuu ku dul fadhiistay sariirtii kadibna halaaqyo iyo jimicsi bilaabay. Naagtiisa oo dhinac jiiftay ayaa ku toostay oo tiri “maxaa kugu dhacay?”

wuxuu yiri “Hurdo ayaa iga soo dhici weyday”.

Waxey tiri ” Ma rabtaa sida ugu dhaqsiyaha badan ee hurdo kaaga soo dhici karto?”.

wuxuu yiri “Haa”.

Waxey tiri ” istaag oo jikada gal, kadibna caano qaboojiyaha kala soo bax, koob dheer ku shubo, kadibna malabka aan saakay soo iibiyey qaanadda kore kala soo bax, xoogaa yar ku darso, qaado soo qaado oo ku walaaq kadibna mikoroolka geli oo wax yar kululeyso, iyadoo qandac ah cab, kadibna koobka dhaq oo meeshiisa ku celi, qaadadana dhaq oo meesheeda geli, malabkana meeshiisa ku celi. Kadibna qaboojiyaha gudihiisa soo nadiifi, kadibna jikada soo nadiifi kadibna…….”

Iyadoo warkii wado ayuu soo booday oo yiri ” bes bes bes……warka badan iga dhaaf hurdo ayaa i haysee.

# # #

1.

5. HEER MUQDISHO

hada ka hor nin heer muqdisho ah ayaa wuxuu soo degay hargeysa in badan ayuuna ku noolaay hargeysa maalin maal maha ka mid ah ayaa wuxuu idaacada ka maqlay dagaal culus in uu ka dhacay JILIB kii heer muqdishaha ahay ayaa wuxuu u soo orday mid ey saaxiibo ahaayeen oo her hargeysa ah markaas ayuu wuxuu ku dhahay saxib ma maqashay maanta in uu dagaal culus ka dhacay jiliB kii heer hargeysa ahay weligiisa ma uusan maqlin jilib wuxuuna u maleynaayay in uu ku ciyaaroyo saxibkiisa markaas ayuu isagane dhahay waxaa ka daarnaa kaas kii ka dhacay xusul

# # #

6. MUKULAAL SOMALIA JOOGTAY

Mukulaal Somalia joogtay ayaa sacudiga loo waday guriga lageeyey mukulaalkale oo sucudi ah ayaa joogtay aad ayey u buureed guri gana waxaa joogay dooli aad ubadan dooliga iyo mukulaasha waa saaxiib tii soomalia laga keenayay dooligii ayey weerar kuqaaday mukulaasha sharci kuma ey joogin ciqaamad ayaa laweydiiyey markii laga waayey waa lasoo tarxiilay.

# # #

7. SHEEKO XIISO LEH SHEEKH IYO REER BAADIYE

Nin shekh ayaa maalin dad wacdinayay Wuxuu ka sheekeeyay dagaalkii Nabiga (NNKH), dhibka loogu gaystey ee ahaa DAGAALKII Uxud, markii uu marayay meelihii uu dhaawacyada ka soo gaareen Nebiga uu u sheegayay dadkii uu wacdinayay ayaa waxaa ka soo dhex baxay nin Reer baadiyo ah, markaasuu sheekhii labada Indhood dharbaaxa u geliyey. Markaasuu yiri Ninkii Reer Baadiyaha ahaa "Waadba joogtay oo waadba sheegaysaa maxaad Nabiga dadka dhibka u gaysanaya aad uga celin wayday"

# # #

8. SHEEKO JAWI DAGAN

Nin baa maalin dhakhtar u tegey isagoo u sheegay dhakhtarka inuu xanuunsanayo. Dhakhtarkii ayaa ninkii baadhitaan ku sameeyey su'aalana

1.

weydiiyey si uu u ogaado inuu ninkan cudurka haya iyo noociisa.uu bal helo Dhakhtarkiise wuxuu dareemay in ninkan uu hayo wax la yiraa cuqdad nafsi ee uusan cudur kale hayn. Wuxuuna dhakhtarkii ninkii ku yiri "Waxaan kugula talinayaa inaad iska dhaadhicisid inaadan xanuusanayn markaas ayaad bogsan doontaa".

Ninkii ayaa yidhi "Waa hagaag dhakhtaroow", oo inuu tago isku dayey, markaas baa dhakhtarkii yidhi "Waar ninyahow lacagtii baadhitaanka isii". Ninkii baa yidhi "Dhakhtaroow, adiguna iska dhaadhici inaan Kusiiyey:

# # #

9. U CUT MY LEG

Beri ayaa nin damcay inuu warqad ingiriisi ah u qoro saaxiibkii oo jooga London. ninku inyar oo ingiriisi ah ayuu ka bartay buug la yidhaa, English for africa .isaga oo isticmaalaya intiisii yarayd ayuu saaxiibkii uqoray warqadan:

waxu yidhi:

You cut my leg(waad ilug gooysay)

my shop stands up(dukaankaygii wuu kacay)

and i opened my wife(xaaskaygiina waan fury)

# # #

10. NIN SOMALI AH

ingiriiska (uk) Nin Somali ah ayaa lagu soo eedeeyay inuu dilay nagtiisa. Markii maxkamadii lakeenay ayuu diiday af-celiyihii ay dowladu u qabatay doortayna mid uu yaqaanay oo uu moodayay inuusanba jirin qof qudha oo ka badiya afka-ingiriiska . Waxaa uu u sheegay inuu sheego oo kaliya waxa uu u sheego oo xabaashay, naagtaydii kale bay iga furtay, dukaankaygiina wuu kacay, wayna ilu goysay. Turgubaankiibaa waxa uu yiri "I will tell you, what he told me, he is fed up by this woman, she enterred Nin soomaali ah oo jooga wadanka qudha. Hadalkiisii ku bilaabay "naagtan Khaatiyan baan ka taagnahay, badahaygii bay

1.

gashay,ma nooli, way in nolol his ocean,she bured him alive,she open his other wife and his shop stand up.and she was cutting his leg.

# # #

11. WAA QISA GAABAN

Waa qisa gaaban oo aniga shakhsiyan igu dhacday malintii koowaad ee aan sweden soo galay tareen ayaan kasoo raacay magaalada maalma anoo kusii jeedey göteborg mar aan si marayno meel dhexe ayaa waxaa bilowdey in la jekimo tikidyada markii la isoo gaaley ayaan dhiibey tiketkeyga wey jekintay oo ay iisoo taagtay waxayna ii raacisay **tag** weyna iga dhaqaaqday anigii inaan yaabay aan is dhahay ninyahow tiketkaaga maxaa ka qaldan anoo isleh waa laguu soo laaban doonaa aan soo gaaray göteborg maalma ka dib waxaan ogaaday tag (tack) inay tahay mahadsanid Borås.

# # #

12. KURDI SOMALI

maalin baa waxa dhacday in nin soomaali ah uu damcay inuu iska dhiibo wadanka NORWEY markaas ayaa maalintii uu tagay meesha layksa dhiibo markaas meesha layska dhiibo waxa ah layn dheer oo dadka is dhiibayaan istaagaan markaas ayaa uu laynkii istaagay ninkii soomaligaa ahaa markaa ninka somaligaa waxa ka horeeya 4 nin oo kurdiya markaa nin cadaana ayaa dadka waxa uu waydiinayay meesha ay ka yimaa…deen ninkiicadaanka ahaa ninkii ugu horeeyay ee krdiska ahaa ayuu ku yidhi adigu xageedka timid? markaas ayuu yidhi anigu waxaan ahay KURDI CIRAAQ kii labaad ayaa isna lawaydiiyay markaas ayuu isna dhahay anna waxaan ahay kurdi IRAN kii saddexaad ayaa isna lawaydiiyay meesha uu ka yimid isna wuxuu dhahay waxaan ahay KURDI TURKISH kii afaraadna isna waxa la yidhi xaged ka timid wuuxuuna yidhi waxaan ahay KURDI SUURIYA hadaba ninkii somaliga ahaa ayaa la soo gaadhay isna waxa lagu yidhe xageed ka timid wuxuuna yidhi waxaan ahay KURDI SOMALI ehhehhehe

# # #

1.

13. GACALIYE WARKIISA ISKA DHAAF

Mida naagtiisa dilaayey laamiga dhexdiisa, ninaa soo maray meesha wuxuu dhahay war heedhe naagtada lama dilo ee hadad rabto in aad disho midkale un la soo guurso saase ku dilantahaye, kuma fahmin maxaa kawada uu dhahay kii wax dilaayey, naagti aa hoos ka soo qeelisay GACALIYE WARKIISA ISKA DHAAF EE I DIL KULAHA JUGTA LA II QAATAYE.

# # #

14. WALIGA QOF HA ISKU XAMAN.

maalin ka mid ah malintas qabow aya jiray nin swedish oo wato eey aya so racay bus an sarnen aniga iyo gabadh kale ninka waxow sanka kulaha diif mar´kaas ayey gabadhi dhahday wadankan wa qabow fiiri dadki u dhashay aya diifka ka da,aa markas ayu ninki iska tiray diifka wan la yabay sida u ku fahmay ka dib gabadhi aya i weydisay maxa eey lagu dhaha swedish? inatana u jawabin aya ninki swedishka aha dhahay ;Hund; markas ayu dhahay somaliyey wa xan badan tihin yaab darted iyo xishood ayay gabadhi war dambne¨´ uga so bexi wayay mahad sanidin somaliyey waliga qof ha isku xaman.

# # #

15. MAALINBAA 3 NIN

maalinbaa 3 nin waxay isku qabsadeen anaa kaa caajis badan iyo anaa kaa caajis badan sidii loo murmayey ayaa waxaa la isku afgartey in loo tago qaali ama garsoore kala saara 3 daasi nin

garsoorihii ayaa loo tagey markaasaa loosoo ban dhigay arinkii qarsoorihii oo layaaban raga ayaa ku yiri waan idin kal saaraya ee hal hal u istaaga oo kaan u waco ha sheego wixii kugu daraa oo ku dhaca asagoo wahsanaya …….

1; aad ayaa yiri aniga maalin ayaan waxaan jiftey geed hoostiisa waqti subax ah waxaa iga gubay hooskii subaxnimo waxaa igu imaaday qoraxdii caajis dartiis ayaan la toosi waayay oo maalinkii oo dhan qoraxdii sidaas ayey dusheyda ugu dhamaatay

2; aad ayaa asina hadlay oo yiri anigana habeen ayaa anoo hudaya waxaa i toosiyay xaaskeyga oo i igu tiri war toos daad ayaa ku qaadi rabee waantoosi waayay caajis dartiis waxaa iqaday daadkii

3; aad ayaa asina hadlay oo gacmaha meegaaray ama war wareejiyay asiguu ula jeeda inuusan caajis dartis la hadli Karin.

# # #

16. SHIIKH CABDULQAADIROOW

Kolkii soomaalidu Sucuudiga ay u shaqo tagi jireen, ayaa maalin maalmaha kamid ah waxaa gaadhi xaajiyad ah wada raacay labo nin oo shaqo doon ah, mid wuxuu ahaa reer waqooyi, kan kalena reer koonfur. Hadaba waxay gaadhigii saarnaadaanba gaadhigii baa kula dhacay meel god ah, ka dibna waxaa naxay kii reer waqooyiga ahaa ahaa, wuxuunayidhi Yaarasuululaahi!!, markaasaa sheekh carab ah oo agtiisa fadhiyey baa intuu bahal dhirbaaxo ah ku jiiday, ku yidhi ilaahaaga ma taqaanid miyaa?. Kadibna kii reer waqooyiga ahaa baa iska aamusay isagoo cadhaysan, wuxuu gaadhigii sii socdaba mar labaad hadana meel kale oo god ah buu kula dhacay, Kolkaasaa kii reer koonfurka ahaa yidhi Shiikh Cabdulqaadiroow!! Judhiiba kii reer waqooyiga ahaa oo cadho bakhtiisan baa intuu dharbaaxo kadh ka siiyay ku yidhi war kii weynaa baa meel loo la' yahay markaasaad shiikh lasoo ordaysaa.

# # #

17. NIN REER BAADIYA EH AYAA DAMEER KA FAKADAY.

dameerkii suu uraadinaayay ayuu magaalo yimid magaaladii markuu yimid ayuu waayay cid marti galiso kadib Hotel baa la geeyay qolkii la geeyay ayuu ka yaabay qolka quruxdiisa iyo sida eey sariirta u labisantahay iyo isaga dharka uu qabo wasakhdooda, waxuu go'aansaday inuu sariirta hoosteeda seexdo albaabkiina muusan xirin, wiil iyo gabadh is wata ayaa hadana yimid huteelkii ninkii huteelka masuulka ka ahaa waxuu dajiyay isla qolkii ninka reer baadiyaha ahaa la dajiyay inuu.
iska tagay ayaa loo maleeyay maadaama qolkii iska furan yahay sariirtiina uusan ku jiifin, sidii ayeey qolkii ku dageen sheekadii markeey bilaabeen ayuu wiilkii dhahay macaaneey markaan ku arko aduunka dhan ayaa la

i'horkeenaa jaceeylkaada dartii???Ninkii reer baadiyaha ahaa intuu hadalkii maqlay.
ayuu sariirta kasoo hoos baxay.. kulahaa walaaloow aduunyada dhan haddiii lagu horkeeno dameerkeeygii ma aragtay ?????.

# # #

18. HADA KA HOR

Hada ka hor oday duq ah oo waxaa jiray fuundi ahaa, waxa uu geedo kasoo gooyn jiray webiga jinkiisa, kadibna wuu kasii ganacsan jiray, maalin ayaa Miishaartii uu watay webiga ugu dhacday odaygii murugo Gabar jinniyad ah ayaa meesha kasoo baxday.

Oo weydiisay maxaa kugu dhacay odaygii waxa uu dhahay miishaarteydii risiqeyga dhan ku xirnaa ayaa meesha iiga dhacday,

Gabartii jinniyada aheyd waxay gashay oo yumbatay biyihii waxay soo baxday ayadoo wado Miishaar dahab ah Tan miyaa

Miishaartaada? ayay dhahday, odaygii maya ayuu dhahay, hadana way yumbatay biyihii mar labaad, waxay soo baxday ayadoo wado miishaar qalin ah tan miyaa ayay dhahday?

Odaygii maya ayuu dhahay, markii danbe mid bir ah ayay soo bixisay tan miyaa ayey dhahday? odaygii haa ayuu dhahay, Jinniyadii

Odayga daacad nimadiisa ayey ku faraxday kadibna way siisay miishaartiisii,waxayna hadiyad ahaan usoo raacisay labadii miishaar ee kale ee dahabka iyo qalinka kala ahaa. Maalmo kadib hadana odaygii isla webigii waxaa ku dhacday Xaaskiisii, gabartii jinniyada eheyd ayaa imaatay maxaa kugu dhacay? Xaaskaygii ayaa webiga iiga dhacday hada ayuu odaygii dhahay.

Jinniyadii webigii ayay yumbatay kadibna waxay soo baxday ayadoo Nimco Dareen wado waxay dhahday tan miyaa xaaskaaga? odaygii waxa uu dhahay: HAA waa ayada,

jinniyadii odayga beentiisii ayay ka xanaaqday maxaad been u sheegeesaa ayay dhahday, odaygii wuxuu dhahay: waxaan ka cabsaday in aan Maya

dhaho oo hadana mar labaad aad biyaha gashid oo FARXIYA FISKA aad soo bixisid maya aan ku dhaho, kadibna aad mar kale gashid oo Ikraan Caraale soo bixisid kadibna

Maya aan ku dhaho, hadana aad soo bixisid xaaskeyga oo "HAA" aan ku dhaho, kadibna ayaga macal xaaskeyga aad isugu keey soo dartid hadiyad ahaan camal ayaan ka cabsaday, oday ayaana ahay awood uma hayo kulligood intaas ayaan ka cabsaday,

Gabartii Jinniyada eheyd markale way u riyaaqday odayga daacadnimadiisa,

Xaaskiisa ayay usoo bixisay, kadibna xaawo kiin ayey hadiyad ahaan camal ugu soo raacisay kkk.

# # #

19. CIYALKA XAFADA

koo ciyalka xafada kamid ah ayaa hooyadiis liin u dirtay sxbka suuqa markuu kasoo gaday oo uu wadada kuso jiray ayuu taraaraxay kadib liintii wey ka dhacday oo ay ka taraaraxday xarfaanki kulahaa "haye waaba kaseesaan guriga miyaa!" wuu iskaga tagay markuu guriga imaaday ayaa hooyadiisa weydisay aaway liinti?

saxibka kulahaa hooyo wey soo socdaan wadada ayaan uga soo tagay.

# # #

20. ARDEY ISKUULEEY

Ardey iskuuleey ah ayaa waxa ay lahaayeen imtixaan ah maaddada "Arts" ama sawirka, markaa ayaa macallikii inta uu sawirey geed ay saaran yihiin shinbiro ayuu ardadii ku yiri hala sawiro dhaqsada …Macalinku aradada wuxuu siiyey " 5 daqiiqo" markii ay shantii dhamaatey ayuu yiri haye haye inta gacmaha isku garaacey oo sacabiyey .. Wuxuu macallikii bilaabey in uu aruuriyo warqadaha markaa ayuu arkay waraaqdii ardaygii ugu danbeeyay oo aan geedkeeda shinbiro ku sawirnayn. markaas ayuuu yiri warayaa aaweye shinbirihii geedka saarnaa .. ardaygii ayaa macalinka ugu jawaabey "Dee macalin adigaa sacabiyay".

1.

# # #

21. RA'IISUL WASAARIHII

Ra'iisul Wasaarihii hore ee Jabbaan Yoshi Morri ayaa wuxuu qorsheynayey kulan uu la lahaa madaxweyihii hore ee Maraykanka Mr. Bill Clinton.

Madaama uusan luqadda Ingiriiska ku fiicneyn Ra'isul Wasaaruhu ayaa waxay tarjumaanaadiisa u sheegtay in uu hadalku kubilaao "How are you?" oo la macno ah "Sidee tahay?", Clintona uu ku jawabi doona "I am Fine" oo ah "Waan fiicanahay", dabadeedna wuxuu raacin doonaa "And You?" oo ah "Adiguna?" kolkaas waxaad ku jawaabtaa "Me too" oo ah "Aniguna sidoo kale". Intaa wixii ka dambeeya howsha anagaa sii wadi doona ayey tarjumaanadiisii ku yiraahdeen Ra'isul wasaare Yoshi Morri.

Mar alla markii ay kulmeen Ra'isul Wasaarahii iyo Bill Clinton

oo ay markaa la socotay xaaskiisa Hillary ayaa waxaa uu Ra'isul Wasaaruhu si khalad ah u yiri "Who are you?" oo macnaheedu uu yahay "Kumaa tahay" balse uu ula jeeday "How are you?", Clinton oo yaaban , dhinacyadana fiir fiirinaya xaaskiisuna ay garab taagan tahay ayaa isagoo kaftamaya ku jawaabay "I am Hillary's husband" oo ah "waxaan ahay odaygii Hillary (Xaaskiisa)" wuxuuse u raaciyey "And you?", Ra'isul Wasaaraha oo sugayey ereygaas dambe ayaa ku jawaabay "Me too" oo la micno ahayd "anigana sidoo kale", jawaabtan dambe waxay si aad uga yaabisay Mr. Clinton oo u fahmay in uu ra'isul wasaraha leeyahay "anigana waxaan ahay odagyii Hellary".

# # #

22. NAAG MASEYRSAN

Naag maseyrsan ayaa waxaa u yimid nin safar ah oo biyo uu cabo doonayo. Ninkii socotada ahaa ayaa waxa uu yiri Walaal i waraabi. Naagtii maseyrsanayd baa mooday inuu waydiiyay ninkeedii kolkaasay ugu jawaabtay aqalkaas buu maantoo idil kujiray. Ninkii socotada ahaa ayaa

garan waayay waxay ka hadlayso kolkaasuu yiri maxay. Waxay mooday inuu yiri waa arin yaableh kolkaasay tiri aniguba sidaas baan u yaabanahay.

# # #

23. NIN AAD U MARQAAN

NIN AAD U MARQAAN DHAAFSAN AYAA MAALIN CIIDA KU SOO BAXAY MEEL LAGU TUKANAYO SALAADII CIIDA OO LOOTAGAN YAHAY MARKAA SUU SAFKA DHINA CIISA KA GALAY ISAGA OO DOONAYA IN UU DADKA LA TUKADO SHEEQII AYAA SALAADII XIDHAY OO SIDII CADADA AHAYD BILAABAY TAGBIIRTII MARKII AY SADEX JEER MARAYSAY AYUU NINKII HEER WAQOOYI YIRI NAW WAR SOOTA ISQABAN LA SALAADII MAANTA.

# # #

24. AAKHIRO SIGAARKA MALA CABAA?

NIN AYAA SHEEKEYEY WAXUUNA KU WARAMAY XILI XILIYADA KAMIDA AYUU SEEXDAY ASAGOO HURDO SAQDHEXE KU JIRA AYUU RIYOODAY. HARIYOODE MAXUU KU RIYOODAY WAA TAN RIYADISII WAXUU YIRI WAXAAN KU RIYOODAY ANOO AAKHIRO JOOGA JANADANA KU JIRA XARAARAD AYAA IQABATAY AMA INAAN SIGAAR CABO AYAAN UBAAHDAY XABAD BAAN HELAY WAXAAN U BAAHDAY DAB AAN KU SHITO DADKI JANADA AYAAN DAB WEYDISTAY WAXAA LA IISHEEGAY IN AAN DAD U DOONTO OO KASOO SHITO SIGAARKA NAARTA WAAN BAXAY NAARTAAN TAGEY WAA KASOO SHITAY SIGARKII CABAAR BAAN DAAWANAYEY WAXA KA DHACAYA SIGAARKAYGII AYAAN SOO DHAMAYSTAY WAAN SOO NOQDAY ALBAABKII JANADAAN IMI MISE WAXAA TAGAN MALAK CUSUB OO KII HORAA I OGAA INAAN BAXAY WAA LABADALAY INAAN GALANA DAMCAY WAA UU IGA DIIDAY WAXAAN U SHEGAY INAAN NAARTA DAD U DOONTAY IGAMA UU AQBALIN JEEGADUU INTA I QABTAY HALGAAD ILAALAADSHAY OO NAARDII IGU TUURAY MARKAASAAN SOO.

# # #

1.

25. CIYAAL XASHIISH

Mid Ciyaal Xashiish Ah inta la istaajiye aa la dhahay naftaada ka hadal: markasu yiri magaceyga waa Xasan waxan ahay cristan Shan Saladoodna wa Dukadaaa waxan dhashay 1950 waxaana jiraa 28 sano dhalashadeyda waa

Suudani laakin waxan heestaa passport japan ah waxan ku dhashay england gaar ahaan magalada new york, waxaan aadaa Jaamacada Cairo ee u dhaw Kacbada.

# # #

26. QURBAHA

Nin reer u dhashay oo qurbaha ka tegey ayaa markii ugu horreysey waddanka ku laabtay isaga oo aad u qiiraysan. Maalin buu isaga oo lugaynaya meel ka mid ah magaalada Hargeysa wuxuu soo ag maray waab yar oo ay islaani shaah ku iibinayso, halkaas oo uu fadhiyay nin kale oo isagu dadka aan weli waddanka ka dhoof in ah. Halkaas waxaa ku dhex martay saddexdan shakhsiyadood sheeko qosol iyo xik mad leh oo fariin muhiim ah xanbaarsan, iyo weliba Maanso jiifto ah.

Ninkan qurbaha ka yimi waxa la yidhaa "Qurbaawi", islaantana waxa magaceeda la yidhaa "Qaleeya", ninkan waddanka degganaa ee islaanta waabkeeda hore u sii fadhiya yna waa "Qowdhan".

Ninkii Qurbaawi ayaa markuu waabkii soo istaagay hadalka bilaabaya oo odhana ya:

"Meeshan sidee baad ugu nooshihiin, waa meel ay dadkii dhisan waayeen, bal eeg siday u burbursan yihiin waddooyinkani. Weligay meel sidaa waddooyinkeedu u xun yihiin kumaan arag caalamka intaan marayay."

Islaantii meesha shaaha ku iibinaysay ee Qaleeya ayaa u jawaabaysa oo odhana ysa:

"Hooyo waan ku arkaayoo nin dibadda ka yimid baad u eegtehee, miyaanad hoo yo la socon wixii waddankan ku dhacay. Beri baa waxa la yidhi markii ay diyaara dahii dawladdii Siyaad Barre dadka Hargeysa ku

1.

rushaynayeen ayaa oday iyo is laantiisa iyaga oo jooga Geed Deebleh, ay halkaa diyaaraddii ka soo baxday maa lin ka mida maalmihii rusheyska.

Odaygii ayaa islaantii ka cararay intuu aad u naxay markay naftii qabatay. Ka dib markii ay dayuuradihii dhaafeen ayaa islaantiisii odhanaysaa "Bal odaygan fulay ga ah eega, raggii hore ma iyagaa carari jiray".

Odaygii baa intuu deg-deg u soo booday dhakhso ugu jawaabaya islaantiisa oo o dhanaya "Ee orodoo naga tag, raggii hore ma samadaa lagaga iman jiray" Islaant ii Qaleeya oo tusaalahaa u soo qaadatay oo ku leh ninkii Qurbaawi; dhulkan Soma liland samada ayaa lagaga yimi oo ha barbar dhigin waddamadaa aad soo aragt ay ee aanay iyaga cidi rusheeynin.

Ninkii Qurbaawi baa dhinacna ugu qushuucay tusaalahan qosolka iyo xikmada wa ta ee ay islaantu u dhiibtay, dhinacna ka yara xishoodsan oo isagoo is dhaafna ka muuqdo ku leexinaya arrintii Siyaasiyiinta waddanka oo odhanaya:

"Hooyo waan ku fahmee, laakiin waddankan siyaasiyiin ayaa ku ciyaaraya oo aan dadkii waxba u qabanaynin", halkaa waxa doodii la wareegaya ninkii meesha fadh iyay ee "Qowdhan" oo hadalkii qaadanaya oo odhanya: "Horta qolooyinkiinan qu rbaha nagaga yimaaddaa ereygan siyaasad qalad ayaad ka fahamteen oo dhinac kale ayaabad u qaaddeen". Ninkii Qowdhan oo hadalkiisii sii wata ayaa odhanaya:

"Beri baa nin reer miyi ah lagu yidhi bal waxaad sharaxdaa erayga "Siyaasad" mic nahiisa? Ninkii reer miyiga ahaa ayaa intuu dhinacyada eegay odhanaya isag oo sharaxaya erayga siyaasad; " Erayga Siyaasad waa marka konton nin oo isku re era oo meel ku shiraysa adigoo shirka kula jira uu midi kabahaagii gashado mar ka shirka laga soo baxo, sidii aad u garan lahayd kii kabahaaga gashaday baa la yidhaa "Siyaasad". Sidaasuu ninkii reer miyigaa ahaa u sharaxay siyaasad.

Hadalkisii isagoo sii wata ninkii Qowdhan wuxuu odhanayaa:

1.

"Markaa ninkaagan dibadda ka yimidoow dareenkaagu ma xuma laakiin halkaa ay diiraddu kaa qabsatay maaha xaalku, wax aad siyaasad moodaysid ayaan siyaasad ahayn. Ma ogtahay in Dhulkii uu idinka uun idin sugayo oo aan cid kale u maqnayn.

# # #

27. GABADH

Gabadh ayaa ninkeeda u qortay warqad ah inay baxday oo guriga reerkooda ay aaday aysanna usoo laaban doonin ! sariirta hoosteda ayeeyna gashay si ay u ogaato wax uu samayn doono …

ninkeedii ayaa soo galay warqadii ayuu arkay uu aqriyay kadib qalin ayuu soo qaatay wux ayuuna ku qoray, kadib dharkii ayuu iska badalay oo kuwa kale ayuu xirtay wuxuuna iska dhigay inaysan waxba dhicin oo kale, taleefankiisa ayuu lasoo baxay oo inta qof wacay ku dhahay “haa xabiibtii war horta hambaliyo xaaskaygii wey iga tagtay, taas qaati ayaanba ka taagnaa illahay muxuu iikaa tusi waaye inta aan guursan balaayo qabtadaan hada 30 daqiiqo ka dib waan kuu imaanayaa ee isug mcn”

xaskiisii waa ay maqashaa oo sariirta ayey ku hoos jirtaa iyada oo xanaaq u dhiman rabto ayuu baxay ninkeeda kadib waa ay soo baxday ayadoo xanaaqsan kuna fikiraysa “ma ninkaaa dishaa mise naagtaa mcnto uu lahaa ayaa dishaa mise cidaadii baa iska aadaa meshaan waxba kuuma yaalee” ayee waxa ay soo aaday warqadii uu qoray si ay u fiiriso qoraalkiisa: waxaa ku qorneed “xabiibtii lugahaaga ayaa banaanka yaallo oo sariirta hoosteeda aan kaa arkay qadop ayaana soo iibinayaa waana soo laaban ee taleefan been ah ayaan diraye is daji xabiibti”kkkkkk

# # #

28. MAALIN MAALMAHA KA MID AH

Maalin maalmaha ka mid ah ayaa nin wuxuu yimid gurigiisa asoo markaasi kasoo rawaxay magaalada.

Maalin jimce ayey ahayde ninku wuxuu damacsanaa inuu xoogaa hurdo hadaba markii uu yimid gurigiisa waxaa uu durba galay qolkiisa jiifka ahaa si uu u hurdo.

1.

Xaaskiisa markaas waxaa ay cunto ku karineysey jikada, markiba qolka ayuu kaso baxay wuxuuna u yimid xaaskisa wuxuuna ku yiri “heedhe kaali duqsi guriga dhex duul duulaya naga jaf” naagtisa ayaana ugu jawaabtay “aniga hadda cunta ayan karinayaaye sunta kaneecada armaajada ayeey dul saaran tahe iska buufi” ninkii markiba wuu laabtay.

Hadaba naagtisa oo qadada soo diyaarisey ayaa ninkii usoo gashay asagoo hurdadaya ayeey toosiyey si uu u qadeeyo waxayna ku dhahday “oo waad hurdaysaabe tixsigii aad ka cabaaday meeyey” markaas ayuu ninki yiri “waa dhameeyey waliba 8 ayaad diley 4 niman ah iyo 4 naago ah!

Naagtisa aya weydiisey “sidee ku kala garatay nimankooda iyo naagahooda” ninkii ayaa yiri “waxaan ku kala gartay 4ta NIMANKA MIISKA AYEY SAARNAYEN OO SOKOR AYEY CUNAYEEN 4ta NAAGAHANA ARMAAJADA AYEY SAARNAAYEN OO MURAAYADDA AYEY ISKU FIIRINAYEEN!!!!”.

# # #

29. ODAY REER BAADIYA AH

Sheeko Qosol ah oo gaban , oday reer baadiya ah ayaa u soo safaray magaalada bil ramadaan walina ramadana muu usoosafrin magaalda habeenkii buu suuqa tagay masaajid lagu tukanayo ayuu arkay cishaa i buu is idhi so tuko yayna ku dhaafine masajidkii buu jamaca la xidhay ileen trawiix baa latukanay odaygii isagoo yaabsan buu dhameestay saladi masajidkii markuu ka soobaxay ayu arkay 3 oday oo iswareesnaya mid ba idhi waar sixir barar baa dhacay ee sonkortii imisaad ku ogaydeen mid baa u jawaabay markaasu idhi 20 dolar markaas bu idhi hadda 40 ayay maraysa mid kale aya idhi oo baastada imisaad ku ogaydeen markaas buu mid kale u jaawabay oo idhi 10 dollar markaas buu idhi hada 20 ayay maraysa markaas buu intuu kusoo dhex dhacay odaygi baadiyaha aha odayaashi is wareesanayay ayu idhi waar salaadi cishaa i imisaad rakco ayaad ku ogaydeen markaas bay odayaashii oo yabsan u jawaabeen dee 4 rakco markaas buu idhi hada 23 rakco ayay maraysa wax kastiba way kaceen

# # #

1.

30. MACALIN

Macalin ayaa ardaydiisa ugu sheekeenayey maalinta qiyaamaha wuxuu kaloo usheegay in dhulka iyo cirka la laalaabaayo dadkana dhimanayan..

cunug yar oo ardayda kamid ah ayaa weydiyey Macalinka wuxu dhahay "macalin maalintaas dugsi majiraa " kkkkkkkk

# # #

31. NAAG WARIYE

naag wariye ah ayaa wareysaneysay nin beeraaley oo labo dibi midna cad yahay midka kale madowyahay haysta

waxey tiri : maxaad cunto ahaan ku quudisaa

suu yiri : ma kan cad mise kan madow

Seey tiri : kan madow

Suu yiri : cows (coos)

Sey tiri kan cadna

Suu yiri : sidoo kale cows

sey tiri : halkeed ka waraabisaa

suu yiri : ma kan cad mise kan madow

Seey tiri : kan madow

Suu yiri : webiga

Sey tiri : kan cadna

Suu yiri : sidoo kale webiga

Intey yaabtey tiri haddii aad isku si u cunteysiiso una waraabiso maxaad iigu haysaa ma kan cad mise kan madow

1.

Suu yiri : sababtoo ah kan madow anigaa leh

sey tiri : kan cadna

Suu yiri : sidoo kale anigaa kan cadna leh

Wareer badanaa

# # #

31. SHEEKO QOSOL IYO XIKMAD BADAN WADATA!!

Nin Boqor ah ayaa ku riyooday isagoo Ilkihiisa oo idil ay ka wada jabayaan, markaasuu u yeertay Nin ku xeel dheer Fasirka Riyooyinka, kiiyoo markii uu yimid ku yiri Boqorka:

Ninkii: Boqoroow ma dhab baa inaad Riyadan aragtay?

Boqorka: Haa waan arkay.

Ninkii: Hadaba Boqoroow waxaan ka xumahay inay Riyaduna fasireyso arrin murugo leh. Waxayna tahay, in Reerkaaga oo dhami ay adigoo jooga hortooda ku dhiman doonaan!!

Boqorkii oo Warka Ninku sheegay aad uga carooday ayaa Xabsiga dhigay Riyo Fasirihii. Wuxuuna mar kale u yeertay Nin bal midkan ka duwanaada oo Riyada si kale u fasira, kii loo keenayna isla sidii midkii hore buu wax u sheegay waana la xiray, illaa Dhowr Nin kale ay sidaas oo kale noqdaan.

Ugu dambeyntii Nin buu Boqorku u yeertay oo yiri bal adna Riyadan fasir. Kiina markuu Boqorka ku celceliyay oo ku adkeeyay inuu Riyada sida ay tahay u arkay, Boqorkuna Haa un ku jawaabay. Ayuu yiri:

1.

Ninkii: Boqoroow aad baan kuugu hambaliyeynayaa!

Boqorka: Maxaa dhacay ood igu hambaliyeeyn?

Ninkii: Riyadu waxay sheegeysaa, in Adiga aad ugu Cimri dheeraanayso dhamaan Ehelkaaga!

Boqorku aad buu u farxay, Ninkiina wuu Abaal mariyay waliba si heer sareysa.

Hadaba halkan waxaa laga arki karayaa, in Hadalka isagoo isku micno ah, hadana sida loo kala dhigayo iyo Qofba Qaabka uu u sheegayo lagu kala duwanaanayo. Waxaa marka haboon inaad had iyo goor ka fiirsato sida aad u hadleyso, ka hor inta aadan Dhawaaqin!!

# # #

33. SHEEKO DHAB AH OO KA DHACDAY USA WALIBANA QOSOL BADAN.

Maalin maalmaha ka mid ah ayaa waxaa xanuunsatay hooyo ka dibna waxay kaxaysatay wiilkeeda oo qurbaha ku dhashay gaar ahaan wadanka Mareykanka si uu ugu turjumo Hooyadiisa markii ay tageen Isbitaalkii ayaa Hooyadii waxay hadalkeeda ku bilowday Sidatan :

waan xanuun sanahay markaas ayey wiilkeeda ku tiri u sheeg Dirtoorka habeenkii oo dhan waqtiga dambe xanuun saaid ah baa i qabta waxaad u malaynaysaa in fardo igu tumanayaan mar marna waxaan arkaa markuu xanuunka iga bato Qaruumo Budad Sita oo aan u maleeyo in ay i garaacayaan isla markii Diktoorka waxaa uu u wacday Poolis oo uu arintii ku wareejiyay wuxuuna booliskii faray in dadka qaxootiga dadka habeenkii ilaaynayo in laga qabto kkk.

# # #

1.

35. BASKII 53 IYO BASKII 35(SHEEKO CAJIIB AH OO QOSOL BADAN).

Waa qiso dhab ah oo ka dhacday Dalka Yeman.

Sheekadan waxaa ka sheekeynaya bukaan ka mid ah bukaanno farabadan oo Dhakhtarka ku jira. Wuxuu ku bilaabay sheekadiisa maalin maalmaha ka mida ayaa waxaa Dhakhtarkii aan ku jiray la keenay nin aad u cabaadaya kaasoo cabaadka ka baxaya bukaan kasta oo cisbitalka jiifa is yidhi adiga xanuunka ku haya waxba maaha.

Ninkaasi cabaadaya waxaa la seexiyay qol aniga iga soo horjeeda.

Waxaa la gaadhay xilliga booqashada ehelada loo ogol yahay inay soo booqdaan bukaanadooda meesha kaga jira.

Laakiin waxaa la yaabay!!! ninkan dadka soo booqanaaya oo ah eheladiisa iyo asxaabtiisa qof kasta markuu qolka ka soo baxaayo wuxuu soo baxayaa isagoo qoslaya qosol xad dhaaf ah oo adiguna aad kusii darayso mid kale.

Anigu waan is ciilay la yaab ayay igu noqotay, waxaan is weydiiyay naxariis darrada dadka ka muuqata ee soo booqanaya bukaanka xanuunka haya dartiis la cabaadaya & sida qof walba isagoo qoslaaya oo qosol beerku la cadaaday uga soo baxayo bukaanka.

Markay xiligii booqashadu dhamaatay ayaa waxaan u tagay ninkii bukaanka ahaa , markii aan sidaa ugu soo galay ayaa isagoo cabaadaaya waxa uu igu yidhi, “Adigana ma waxaad iigu timid inaad iga maadsato”.

Intaan xoogaa aamusay ayaan ku idhi maya walaal, laakiin anigu waxaan ahay bukaan waxaanan ku jiraa qolka kaa soo hor jeeda, waxaanan kuugu imid inaan xaalkaaga ogaado anoo ka xun dadka maantoo dhan kugu qoslaayay. Balse walaal waxaad ii sheegtaa sababta dadkan oo dhan iyagoo qoslaya ay albaabka uga soo baxaayeen.

Ninkii waxa uu ka sheekeeyay sababta loogu qoslaayay, wuxuuna yiri, “ Ninyahow hadii aan sheekada kuu sheego anigu waxaan daganahay guri dabaq ah, habeenkii markaan seexanaayo daaqadaha ma xidho guriga, waxaa igu dhacay waan riyooday, waxaana ku riyooday iyadoo aan aakhiro joogno oo dadka loo kala saaraayo ahlu jano iyo ahlu naar.

1.

Waxaa meesha taagan basas fara badan oo ay ku qoran yihiin numbers kala duwan, marka dadkii waa la xaadirinayaa , qofkastana magiciisa ayaa la sheegayaa , qofkii ahlu jano noqdo waxaa la leeyahay waxaa raacdaa baska hebel.

Baska naarta 100 km & baska janada 50km.

Magaceygii ayaa la soo gaadhay waxaa la igu yidhi waxaad tahay ahlu janno waxaad raacdaa baska 53.

Aniga oy farxadu iga farabadatay waxaa doondoonay baskii 53-aad ee aan ku qornaa, markan helay dalaq ayaan soo idhi.

Markii xoogaa uu sii socdo waxaan aragnaa boodhadh ay ku qoran tahay Janadii waxaa idinka hadhay 20-km , kadib waan sii soconay aniga hurdaa ila yara tagtay waxaanse mar qudha ku soo baraarugay oo indhaheygu qabteen km-ka inoo hadhay, waxaana ku qornaa naartu waxaa idin ka hadhay 40 km. Anigii waa naxay, dadkii ila saarnaa ayaan weydiiyay war baskan xagee buu u socdaa? Naarta, ayaa la iigu jawaabay .

Mar labaad ayaan waydiiyay Nambarka baska aan saaranahay waxaa la ii sheegay 35 inuu yahay , illeen farxadii ayaa iga fara badatay oo nambaradii basaska ayaan isku khalday anigoo soo raacay baskii ahlu naarka; talaa igu cadaatay .

War anigu ahlu janaan ahay waan soo khaldamay , waaba la igu qoslay kkkkkkkk,wixii baska saarnaa oo dhani anay igu maad sadeen.

Aadbaan u naxay darawalkii ayaan ku idhi ii jooji ,waxaa uu ii sheegay basku inuu meel qudha istaagayo waana naarta, bidixdaan eegay waxaa iga fadhiya shaydaan , baskii oo dhan anaa lagu wada qoslayaa oo la igu maadsanaya, Anigoo waxaa sameeyo garan la' oo baskii ku sii dhawaanaayo Naarta, ayaan mar qudha harraanti u qaaday Albaabkii baska oo aan iska tuuray, balse waxaan ka war helay anigoo cisbitaalkaan jiifa.

riyaadii ayaa run u noqotoo daaqadii dabaqa ayuu ka soo dhacay wuuna jajab……

1.

36. ODAY BAA WAXAA LA KEENAY WADANKA MARAYKANKA

Oday baa waxaa la keenay wadanka maraykanka (usa) waxaana la geeyay gobolka Minisota (minnesota) oo uu barak ka da'o xiliyada qaarkood. Odaygii waxa uu bilaabay inuu ka ducaysto inuu san illaahay halkan ku dilin. Maalintii dambe ayaa waxaa la waydiiyay waxa uu ku diidayo inuu halkan ku dhinto. Sidii wax kale looga sugayay ayuu yiri "Mahaan Qabrigeeda Qabow aan loo gu jireyn"

# # #

37. NIN REER WOQOOYI AH

Nin reer woqooyi ah ayaa waxuu soogalay masaajid oo salaadii makhrib markaas laga baxay. Markaas ayuu damcay inuu xidho salaadii. Markaas ayuu yidhi Farda ssalaatil maqribi arbacarakacaatin allahu akbar. Marka nin agtiisa kutrukan hayay ayaa gacanta oogu midaaray inuu khaldan yahay. Markaas ayuu isyidhi waad yaraysaye ee badi. Markaas ayuu yidhi Farda ssalati maqribi arbaca rakacaatin allahu akbar. Hadana mar labaaad ayuu isku dayay oo hadana yidhi Farda ssalati maqribi khamsa rakacaatin allahu akbar. Hadana marlabaad ayuu ninkii gacanta oogu midaaray inuu khaldan yahay. Marka asagii oo nin kii yaaban ooleh maxaad samaysaa ayaa midkale oo ordaya sooglaay oosalaadii damcay inuu xidho markaas ayuu yidhi Farda ssalaatil maq ribi Talaata rakacaatin allahu akbar. makraas ayuu intuu kusoo booday ayuu yidhi Naw, war khamsa nalaga diiday markaas ayaad talaada la ordaysaa.

# # #

38. NIN REER MIYI AH IYO MAGAALO:

Nin reer miyi ah iyo Magaalo:

Oday reer miyi ah ayaa u soo safrey magaalo, baahi ayaa qabatay wuxuu ku leexday Makhaayad oo uu is yiri wax ka cun. markii uu fadhiistey ayaa Adeegihii "waiter"kii u yimaaday wuxuuyiri:

Odaygii: Adeeroow waan baahanahaye wax ii keen

Adeegihii "waiter"kabaryeerigii hadba saad u taqaano ayaa wuxuu ku jawaabay.

1.

Baasto saldato,Buskeeti, Koostaato, kutuleeti, aroosto, alfoorno, iwm waxa kalana waa maafiish (oo uu ula jeedo waa dhamaadeen wixii kale.

odaygii oo garan waayey "maafiishka" waxay tahay laakiin ka helay ayaa wuxuu yiri.

Odaygii: Adeeroow Maafiishkaas naftirkiisa maraq iigu soo dar iina soo kululee...

# # #

39. MAALIN MAAL MAHA

Odoyaashii reermiigeynu wali saaranahay iyo dhibka ka heystey afsuuqii magaalada.

Maalin maal maha kamid ah, ayaa oday miiga kasoo safrey oo Muqdisho usoo safrey, odaygu wuxuu ahaa nin aad u indha adag, markii uu magaalada soo galay ayuu maqaayad kusoo leexday, kabaryeerigii ayuu yiri "adeer wax iikeen" "waxaan cuno" kabaryeerigii ayaa u tiriyey waxbaas uu odaygii fahmi waayey.

Odaygu waxa kaliya uu kafahmey waa "digir", wuxuu kayara xishooday ninkii inuu u sheego inuusan afgaran, hase ahaatee odaygii isagoonan digirtii rabin ayuu iska dalbaday.

wuxuu arkey nin kaloo dhankiisa fadhiyey oo aduun hilib iyo baasto cunaaya, si uu kuweydiiyo ayuu waayay waxa uu cunaayo, wuxuu maqlay ninkii oo dhahaayo "biis" ii biis oo uu ula jeedo iigu celi. saa waa loogu soo darey.

odaygii oo dhamaystiri la' digirtii ayaa biis yiri 'isagoo mooda in lookeenaayo hilibkii ninkii" hase ahaatee waxaa lookeeney digir kale. isagoo yaaban ayuu lacagtii bixiyey diidana inuu iska dhigo nin baadiye ka yimid.

Wuxuu magaalda dhex lugeeyaba wuxuu arkey meel tiyaatar ah oo saf loogu jiro. markaasuu iska galay oo meeshii ka wardoon isyiri. Maxamed saleebaan ayaa hees kaqaaday oo dadkiiyoodhan jeclaystey.

1.

iyagoo dadweynihii foori iyo sacab isku daray ayay waxay dheheen "biis" biis biis. Odaygii ayaa soo booday oo yiri ma waalantihiin, war anaa canbuulo beerka layga gooyayee biis ha dhihina.

# # #

40. MIIYAD NA HALIGEESAAA

maalin maalmaha ka mid ah ayaa laba nin oo cabtooy ah waxa ay soo aadayn laamiga gawaarida laga raaco saacadu waxa ay ku beegned 12:35am oo habeenim islamarkana waxa ay ka yimaden baar qamriga laga cabo waxa ay isku diyaarinayen in ay gaari taksi ah raacan si uu u geeyo gurigooda wixii ay laamiga taagnaadanba waxa ay heleen taksi faaruq ah islamarkana gacanta ayee u haatiyen si uu u istaago taksi lihii gaariga waday ayaa si dagdag ah ugu istaagay waxa uuna ku yiri “halkeen idin geeyaa” waxa ay ku yiraahden “gurigeena ina geey waxaan ku siinaynaa lacag dhan 15$.”

Waxa uu ku yiri “gurigiina ii tilmaama” waxa ay ku yiraahden “resturant kooke ayuu ku dhaganyahay” ninkii waxa uu ku yiri “ina keena” ninkii taksi laha ahaaa ayaaa waxa uu xaqiiqsaday labadaan nin in ay qamri badani cabsanyihiin aysan kala garaneen waxba waxa uuna isku dayay in uu qiyaano lacagtana ka qaato isagon meelna geeyn gaarigii oo aaan dhaqaaqin ayuu sheeraleeyay 5daqiiqo kadib waxa uu ku yiri “waan idin keenay ee soo daga” labadii nin ayaa mid kamid ah soo dagay markaas buu ku yiri “waad mahadsantahay darawal” midkii kale ayaa asna soo dagay oo si lama filaan ah dharbaaxsho indhaha ka galiyay isagoon la hadli darawalkii baa is yiri “walee waalagu fahmay ee sideed isaga maslaxdaa.”

Ninkii cabtoyda ahaa ayaa ku yiri “waryaa qayri masuul baad tahay maad gaariga tartiib nooga wadid waad nala gadin rabtay oo 5daqiiqo baad nagu keentay xaafadii mana haligeesaa” kkkkkkkkk

tagsi lihii ayaaaba inta uu qoslay ayuu ku yiri “raali ahaada tartiib baan u wadi doonaaa hada kadib”.

# # #

1.

41. HOOYO NINKII UU KALA DAATAY

Dhaqanka somalida ayaa waxa ay kusoo beegmeysaaa in ay hablaha somaliyed ku daraan amaba ay u guuriyan diyaasbarada amaba dadka dibada ka yimaada iyagoo eegaya qarashka iyo hantida uu heesto hadaba waxaa dhacday sheeko qosol badan ee kala dhexmartay oday diyaasbarada ka mid ah iyo gbdh reer hargaisa ah

42. SHEEKO QOSOL BADAN

Oday ka yimid dhanka yurub ayaaa waxa uu soo doontay gbr islamarkana waxa uu u dhigay aroos wayn oo ay ku faraxsanaayen gabadha iyo cideydaba waxaa loosoo galbiyay sida gabar boqorad ah oo kale markii la keenay gurigii ay wada dagi lahaayen ama ay ku aqal gali lahaayen ayaa waxaa yaraaday isku socodkii dadka waxaaa la gaaray xili ay kali isugu soo hareen arooskii iyo aroosadiii

gbdha aroosada ah wax aqoon ah uma lahan ninka lagu daray kaliya waxa ay ku qanacsaned in uu yahay nin lacag leh waqtiga waxa uu socdaba waxaa la gaaray in ay bilaaban wada sheekeesi gaar iyo kaftan dheerad ah oday gii waxa uu galay musqusha si uu isku soo diyaariyo

markii uu kasoo baxay masqushii amaba suuligii ayuu waxa uu sameeyay **lugihiisii lug kamid ah ayuu iska siibay markiisii horayba caag ahayd** Gabadhii ayaa naxday oo maba aysan ogayn uu uu lug la'yahay

hadana waxa uu sameeyay **ilkihii ayuu iska siibay oo markiisii horayba feek amaba galis ahayd** gabdhii ayaa misana naxday oo maba aysan ogayn in uu ilkaha la'yahay

Hadana waxa uu sameeyay **Gacmihiisii gacan kamid ah ayuu iska siibay oo markiisii horayba caag ahayd**

Gabdhii ayaa misana sii naxday oo maba aysan ogayn in uu gacmey ahaaa

Hadana waxa uu sameeyay **Timihii ayuu iska siibay oo markiisii horayba buruko ahayd**

Gabdhii ayaa misana siii naxday oo sii naxday oo maba aysan ogayn in uu bidaarey yahay islamarkaana Cagaha wax ka dayday qolkana orad oga baxday

1.

gabdh ka bixinaysay todobada ayaa aragtay gbdhii saaxiibtayd ahayd ay todobada ka bixinaysay oo sii cararaysa ayee iyadana kadaba jabsatay

Wax lawada jabsadaba waxaa la gaaray gurigii laga soo galbiyay aroosada oo layaabay labadii gabdho oo iska daba jabsanaya kkkkk

hooyadeed ayaa waydiisay arooosadii oo kabo la'aan ah **"maxaa ku helay meeyay ninkaagiii?"**

iyada oo naxsan islamarkaana fiiksan ayee ku tiri "**hooyo ninkii uu kala daatay" kkkk**

**#** **#**

43. YAA DILAY SAYID MAXAMED CABDULLE XASAN?

Macalin ka mid ah Macalimiinta dhigo maadada Taariikhda ayaa loo soo badalay Iskuul ciyaal Cabtooy ah ka buuxaan, Macalinki ayaa Cashirki koowaad istaajiyay 3 Cabtooydi kamid ah Markaasuu weydiiyay "Sheeg yaa dilay Sayid Maxamed Cabdulle Xasan?" Kii koowaad wuxuu dhahay "Macalin Walaahi aniga ma dilin" Kii labaadna wuxuu dhahay "Macalin aniga shalay Iskuulka dhan ma imaan Ardayda xitaa weydii" Kii sadexaad ayaa dhahay "Macalin aniga Ruux bini'aadam ah in aan dilo iska dhaafe Shimbir xitaa ma dili karo" Macalinki ayaa yaabay wuuna aqbali waayay waxa Meesha ka socdo, Maamulihi iskuulka ayuu u tagay Macalinki wuxuuna u sharaxay waxa Meesha ka dhacay, Maamulahana waa Marqaan Dagan intuu soo baxay ayuu u yimd Ardaydi markaas ayuu Su'aashi weydiiyay isla sidi ayee uga wada Jawaabeen Maamulaha wuu yaabay wuuna ku wareeray waxa Ardayda sheegayaan Maamulihi intuu Macalinka gooni ula soo baxay Kulahaa "Macalin adiga ma iga hubtaa qofka wax dilay inuu Fasalkaan dhigto mise Fasalada kale.

# # #

44. SHEEKO QOSOL BADAN

nin waayeel ah ayaa guursaday Gabadh 15 sanno jir ah. markii gabadhii guriga loo keenay odeygii waayeel ahaa, ayuu wuxuu garan waayay siduu gabadha ugu tagi lahaa, inley waa gabadh oo yar oo aan oqooninba sidey ragga iyo dumar isu galmadaan. odeygii waayeel ahaa ayaa sidaa habeenkii

ku qaday oo gabdhii la seexan. maalin dambe ayuu fekeray, markuu la yimid sheeko cusub. gabadhii oo jikada ku jirta intuu u yeeray ayuu ku yiri, kaalay caawo gaalaan dileynaa. iyadoo garaneynin wuxuu ula jeeda ayay tiri gaaladee dilnaa, oo xagee bay joogtaa gaalada? markaasuu intuu u soo dhawaaday yiri, habeen weliba oo aan isu tagno kun gaal ayaan dileynaa. gabadhii ayaa tiri haddii aan gaalba dileyno habeen weliba waan sameyneyaa. odeygii waayeel ahaa ayaa sidaas cadkiisii ku goosta. markuu habeen weliba sameeyay ayuu tabar beelay. galab casir ah isagoo ku dhex jira odiyaal badan ayay gabadhii u yeertay odigeydii kaalay hee xaaji gaalaan dileynaa. asagoo naxsan, inley waxaad bartay waa baaskaagee ayuu yiri Siyad Cabdulle Xasanba gaalo seef wuu ku laan waayay, ma anagaan gaalo laay karno.

# # #

45. NIN MADAW OO XARAMKA KU DAWAAFAYA

Waxaa qisadaansoo warinaya ama ka shekeynaya sh cariifi waa nin madaw oo xaramka ku dawaafaya ayaa siduu alle u baryayay ayuu xamaasadooday kadib wuu miyir daboolmay intaas ka gadaal waxaa loo qaday huspital magaciisa la yiraahdo ajyaad ninkii waxa uu ka soo baxay koomadii,

laakin waxa uu soo toosay asaga oo dhex jooga qol dharcad dahya cad sariir cad oo udgoon dhex jooga nin badiye ka so tahriibay oo soo rafaadayna wuu ahaa markuu indhaha ka laqaday midig bidix mel kasta wada cadan iyo udgoon markaas ayuu yiri *Allahu Akbar Alle balankiisu waa dhan Al-janaaaaaaaah Al-janaaaah .

Waxa uu is mooday in uu ku jiro janadii kadib ayuu arkay gabdho cad cad oo filinbiiniyiis ah dabcan hosbitaalda waxaa ka shaqeeya wa filiniiniyaan cad cad kolkaas ayuu u qaatay in ay yihiin xuurul ciintiisii alle janada ugu balan qaday markaas ayu farxay asago leh allahu akbar ,

kadib 5tii gabdhood oo mesha taagan waxay u qateen ninkii oo koomadii ka soo baxay oo dawakhsan,

dabcan ayagana waa ay u tababaran yihin qofkaas oo kale in ay qabtaan oo

1.


ku celiyaan sariirtii kadibna ku xiran qalabkii markuu xagee gabdhaha soo aday ayeey ayagiina ku yaaceen ,kkk

markaas ayuu istaagay oo uu ku yiri xabad xabad igu imaada kkkk

maskiiin waxa uu is yiri waa xuurul ciintii ee xabad xabad ?

# # #

46. **SIDA PASSWORDKA**



1.

# # #

47. XAAWOLEYDA

bidaarteyda kudhaartay in anan waligaa kaatagin coz baby girl u are part of my nafta part of my wadanaha part of my ruuxa part of my every thing. immmmmmh that's my future bride wooow the most xilwa tul xilwatiina perhaps the one and only that I wanne on earth, i'm taken excuse me all ya other xaawoleyda, do not mar-maritanka my agagaarka looooooolz

Just Now · Like

# # #

1.

48. NAAG XUN IYO PASSWORD

1-Maskaxdii kaa maqan Google ayay ku jirtaa
2-Ninkii Facebook laga waayo, whatsapp ayaa laga helaa.
3- Abkeey wax xun Like saaroow, wax xun soo galiyoow maas u daahaa

4- Naag xun iyo Password ba waa la boobsiiyaa
5- Nin Like isku saaray, waa ri' isnuugtay
6- Hadii waayeel hadalkiisa la maqli lahaa, naag qaawan Facebook laguma arkeen

7- Nin aad ku darsatay, kuguma darsan
8- Naag ninkii sister ka badiyo, nin ma moodo
9-Gabar offline hakaaga jirto ama Jikada

10-Run iyo Sawirada Gabdhaha-ba waa la cadeeyaa
11- Waayeel Like saar lama dhehee, wuxuu Like saaraa la tusaa
12-Lama huraan waa Facebook

13-Intaadan Like meel saarin ka fiirso.
14- Habar fadhido Video dawasho la fudud
15-Cagtii joogsan weyso marbeey Block la kulantaa

16- Yarka Block saar, gartiisana sii
17- Kommentiyo sidee u kala koreeyaan ayaa loogu kala jawaabaa
18- Soomaali been Like waa saaraan, laakiin been ma Share gareeyaan


19- Relationship lagula yeesho, friends lagula noqdaa ka horeyso.

1.

49. ONLINE IYO OFFLINE

Marwo Facebook lahoo
Viber-kana gasha
Dumar Laga Xushaa
ONline iyo OFfline
Kaydoontaba Hadba LO Galaa
Sawir iyo MEssage
Kaydoontaba Dabcan Loo Diraa

50. GABADH MASEYR BADAN



1.

51. DAHABKA



Xaliimo : i fur
Farah : Maku furaayi
Xaliimo : war I fur
Farax :dahabka aan caawo Dubai kaaga dalbay ma iska cancel gareeyaa hee
Xaliimo : Oh Babe Waan iska Kaftamaayey .... quruxoow
Farah :Dahabka aduunka Ayaan kuu dalbay qofyaheey
Xaliimo: Alla adigaa Qof shidan Ayaad Tahay "Ku heshaa nasiib leh "
Farah : hahah " Ku helaa Ayaan daran " madax xanuun aad tahay..
Xaliimo : Anigaa bbe
Farah : Haa Coz Habeen Walbo Ciyaal camal In laguu sasabaad rabtaa
Xaliimo :Naag caruur cag weyn Ma maqlin miyaa adiga
Farah : Imisaan Feer Wejiga Ooga Bedelay hadaad Ogaan laheyd hmm
Xaliimo : Meeshaan Mahan Ikn sax

52. SOMALI WOMAN

"One day, a Somali woman was caught speeding," said Mukhtar Abdulkadir, a Minneapolis police officer. "A police pulled her over. She was so nervous and fearful while she waited for the police [to] come to her window. Then she glanced at the window. Realizing the officer was a Somali, she said to him, 'Oh, you scared me. I thought you were a real police officer.'"

1.

53. OUR ASSITANCE IN SOMALIA




54. WAY CABSANEE



1.

55. MEDICAL SCHOOL



"Just show me the applications with bad handwriting."

56. AROOS

Tahniyad AROOS LA ISKU ARKAY
Tahniyada waxa diraya dadka kala ah
Maamo Basal baar, maamo bataati macaan, maamo saliid cadey,
Habaryar Muufo tinaar, habaryar baasto makarooni, eedo canjeero. eedo canbuulo jilqab, abaayo kabsar caleen, abaayo yaanyo, aabe bariis, abti xawaaji, abti maraq digaag, adeer tuun, awoowe moos, dhamaan dadkani waxey tahniyad aroos farxadleh u dirayaan lamaanaha aan kala dhicin ee kala ah mudane sokor iyo marwadiisa caleen shaah oo ku aqalgalay magaalada burjiko gaar ahaan jalmada dhexdeeda waxaan leenahay noqda kuwi aan daadan oo aan lagu guban ..... aamiin aamiin aamiin

1.

57.JACEYL DHAB AH



58. ATTORUHU HADDUU DHINTO LACAGTU WAA CELIS!!!

Magaalada Gaalkacyo maalintii intaad dhex socotid waxaad arkaysaa baabuur nooca xaajiya khamsiinta loo yaqaano oo korka ka saaran sameecado waaweyn iyo makarafoon.

Nin la yiraahod Ilbir ayaana ka dhex qaylinaya makarafoonka isagoo ka hadlaya ama xayeesiin ku sameynaya filinka caawa socda.

Filinka haduu yahay Hindi Mr. Ilbir sidan ayuu u xayeesiinayaa: “Waa filin cusub waxaa idiin wada gabadhii wajiga barta ku lahayd iyo inankii dheeraa ee tinta jilicsanaa. Filinka wuxuu leeyahay Shan feer iyo todoba hees yuusan ku dhaafin. Ninkuu dhaafaa waa eey eey dhalay naagtuu dhaafaana waa doofaardoofaar dhashay. Atooruhu haduu dhintu lacagtaadu waa celis!”.

Haduu yahay kuwa jabaanka loo yaqaan: “Waa filinkii laga dabadhacay atirisho kuma jirto. Atooruhu waa bisada ceegada ku dilay waana nin waalan baabuurka iyo baaskiilka iskusi ayuu uwadaa”

1.

Haduu yahay kuwa loo yaqaan Maraykanka: “Waa filin cusub xodxodashadu way ku yar tahay kufsiga dhaca iyo boobka ayaa ku badan. ninkii laga waayaa caawa filinkan waa eey eey dhalay”.

Markaad shineemda gashid halkii laws iyo nacnac iyo wax la mid ah lagu dhex iibin lahaa laba nin ayaa kusoo agmaraysa nina baaldi ayuu caano geel kuwadaa nina baaf hilib nimankaas oo ku dhawaaqaya cad iyo caano cad iyo caano..

Marka la gaaro waqtiga uu soo galayo BBC Laanta Af Soomaaliga filinka waa la joojinayaa , waxaana la dhageeysanayaa BBCda .Hadaad rabto bax hadaad rabto joog waa qasab in aad dhageeysato !!!

# # #

59. “ANIGU MAXAAD IGU DIIDEEN”

Shirkad dhismaha ah ayaa u baahatay nin injineer ah, dad badan ayaa codsi u soo dirsaday. shirkadii markii ay shaandheeysay ayaa waxaa u soo haray laba nin oo sharuudihii oo dhan soo buuxiyey. Labada injineer sidii loo kala saari lahaa ayaa adkaatay maxaa yeelay labadaba waa isku qibrad, isku jaamacado ayey ka soo baxeen, shaqooyin isku mid ahna wey soo wada qabteen, kadibna shirkaddii waxey go`aan ku gaartay in ay imtixaan ka qaado. Qol ayey geeyeen waxayna hor dhigeen laba waraaqo oo min tobon suaal ku qoran tahay. Markii ay imtixaankii ka soo shaqeeyeen ayey maalintii xigtay nin ka mid ah u yeereen oo ku yiraahdeen ” waxaan go`aan ku gaarnay in aan qaadano ninka kale.
injineerkii ayaa yiri ” oo anigu maxaad igu diideen”.
Shirkaddii ayaa tiri “labadiinaba waxaad aheydeen isku qibrad, isku tacliin, imtixaankii aad gasheena min sagaal suaal ayaad saxdeen oo min hal ayaad qaladeen, waxaan qaadanay isaga.
Ninkii ayaa yiri “sidee ayaad ku qaadateen maadaama aan min hal suaal qaladnay?”.
Shirkaddii ayaa tiri “suaasha ugu danbeeyso ee aad qaladeen isagu wuxuu ku qoray (ANIGU MA AQAAN) Laakiin adigu waxaad ku qortay (XITAA ANIGU MA AQAAN

# # #

1.



Ibrahim Rashid Hassan

Ibrahim Rashid Hassan is based in Jijiga Ethiopia and works for the United Nations world Food programme as a Monitoring officer

Ibrahim has a Degree in Education from the University College of Education Zanzibar, Federal Republic of Tanzania.

Ibrahim contributes and writes articles to both local and regional newspapers as well as to national magazines.

1. "Euphoria Men" – published in the Ethiopian Reporter. 16th June, 2012. Can also be found at: https://horntribune.wordpress.com/2015/02/02/euphoria-men/

2. "Voice from the Field" – WFP Kampala Newsletter for July 2010.

3. Hope at last – the story of Zahra Ahmed Ismael – WFP 2013 Annual Report (Co Author – Abdirahman Kassim).

1.

Can also be found at: http://www.somalicurrent.com/2015/04/02/hope-at-last-the-story-of-zahra-ahmed-ismail/

4. FGM The Curse of Our society.

http://www.newbusinessethiopia.com/index.php/manufacturing/18-nbe-blog/393/393

Ibrahim is currently the director of kali libraries a volunteer program to establish libraries in all districts of Somali Region of Ethiopia.

Websites: https://horntribune.wordpress.com/

https://sites.google.com/site/allkaalinews/

Ibrahim lives in Jijiga, Ethiopia.

Tel:0937543890